

Sahanka Dugsiyada Guuleystay

Qaabbee mustaqbalka waxbarashada ardaygaaga!

Waa maxay waxa ugu horeeya ee maskaxdaada ku soo dhaca marka aad maqasho weedha ah “dugsiyada guuleystay?” Wuxaan aaminsanahay in dugsiyada guuleystay ay yihiin goobo amni, caafimaad iyo soo dhaweyn leh, oo ay u dhan yihiin dhammaan ardaydu.

Laakiin waxaan rabnaa inaan maqalno fikirkiina.

Sannadka 2019-20, Portland Public Schools waxay markale iskaashi la sameynayaan Panorama Education si ay u soo ururiyaan maclumaaadka ardayda iyo qoysaska ee naga caawin doona hagaajinta waayo-aragnimada ardayda degmada oo dhan. Wuxaan sahan ku sameyn doonaa ardayda fasalada 4, 5, 7-10 kaas oo ku saabsan khibradahooda fasaladooda iyo dugsiyadooda, iyo qoysaska oo aan ka wareysan doono sida ay u arkaan dugsiga ilmahoodu dhigto.

Sahanka ayaa ka hadli doona mowduucyo ku saabsan dareenka kamid ahaanshaha, amniga dugsiga, jawiga dugsiga, carqaladaha ka qeybqaadashada qoyska, iyo sidoo kale sida ardayda ay uga fikirayaan una dareemayaan kala duwanaanshaha, sinaanta, iyo ku-darida dugsiga.

Taariikhda bilaabida ayaa hadda loo asteeyey Janaayo 27-keeda, xilliga ardayga waxa loo qorsheeyay inuu furnaado illaa Febraayo 14-keeda, sahanka qoysaskana waxa loo qorsheeyay inuu furnaado illaa Febraayo 28-keeda. La soco wixii maclumaaad dheeri ah!

Fadlan uga jawaab si daacad ah oo tixgelin leh, waxaan qadarinaynaa warcelintaada!